
# WAX BADAN OO KU SAABSAN ISKIRIINGAREYNTA

## AMMAANKA NIDAAMKA ISKIRIINGAREYNTA

Iskiriingareyntu waa mid dhakhso ah oo ammaan ah. Sababtoo ah ciribta ka mudida waxay keentaa in maqaarku waxyar dilaaco, waxaana jirta khatar yar oo ah infekshin. Umulisada ama kalkaalisada qaadeysa saamiga waxay isticmaali doontaa gacmo gashi waxayna nadiifin doontaa ciribta ka hor baaritaanka. Waxaa laga yaabaa inaad naas nuujinayso ama aad ilmaha hayso marka baaritaanka la sameynayo maadaama laga yaabaa in ciribta ka mudidu inay keento waxoogaa uusan jeclaysan ilmahaagu.

**Nidaamka Iskiriingareynta Dhibicda dhiigga ah ee Ilmaha dhashay**




## WAA MAXAY NATIIJADA AAN WAXBA LAGA HELIN?

Iskiriingareynta aan waxba laga helin micnaheedu waa ilmahaaga laguma arag inuu qabo mid ka mid ah xaaladaha la iskiriingareynayey. Xaalado aad dhif u ah, waxaa laga yaabaa inay dhacdo wax ka helid la'aan been ah halkaas oo ilmuhu uu qaato iskiriingareyn caadi ah laakiinse uu dib yeesho astaamihii xaaladaha mid ka mid ah. Tani waxay ku dhacdaa qiyaastii hal 100,000 kiis.

## WAA MAXAY NATIIJADA WAX LA GA HELAY?

Iskiriingareynta wax laga helo micnaheedu ma aha in ilmahaagu uu leeyahay xaalad gaar ah. Iskiriingareynta Ilmaha dhashay waxay ogaataa ilmaha 'khatar' korortay ugu jira xaalad. Baaritaano dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo xaqiijiyo natiijada. Ilmaha leh natiijo iskiriingareynta ee wax laga helay waxaa laga qaadaa saamiyo badan. Haddii iskiriingareynta danbe wax laga helo, ilmahaaga waxaa loo gudbinayaa dhakhtar takhsus leh.

## BAARITAANKA DNA

Iskiriingareynta dhibicda dhiigga ee Ilmaha dhashay waxay ku lug leedahay baaritaanka biochemical oo aan ahayn baaritaanka DNA. Si kastaba ha ahaatee, qiyaastii boqolkiiba hal ilmaha qaata baaritaanka biochemical ka waxay muujin doonaan khatarta cystic fibrosis ama xannuunka xummaansha asidhka saliida leh oo ka dib la baarayo DNA diisa.

## QAADASHADA ISKIRIINGAREYNTA WAKHTI DAMBE

Haddii aad doorato inaan ilmahaaga la iskiriingareyn oo aan dib isu bedesho, la hadal dhakhtarkaaga qoyska. Dhakhtartkaaga ayaa kuu balaminaya inuu qaato ilmahaagu baaritaanada saxda ah.



## WIXII MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Barnaamijka iskiriingareynta Ilmaha dhashay ee NSW booqo website ka oo ka daawo fiidyowga halkan

https://www.schn.health.nsw.gov.au/find-a-service/laboratory-services/newborn-screening

ama website ka netwaaga Isbitaalka Carruurta ee Sydney https://www.schn.health.nsw.gov.au/

dooro 'Find a service', oo aad 'NSW Newborn Screening Program'.

## BARNAAMIJKA ISKIRIINGAREYNTA DHIBICDA DHIIGA EE ILMAHA DHASHAY

Cinwaanka: Locked bag 4001,
Wentworthville, NSW 2145
Tel: 61-2-98453659
Iimeyl: NSWH-newbornscreening@health.nsw.gov.au

**MUHIIM** fadlan hay macluumaadkan ilaa saddex bilood ka dib marka ilmahaagu uu dhasho. Waxaa laga yaabaa inaad hesho codsi ah in baaritaanka lagu celiyo ama dhakhtarkaaga ama umulisadaada ayaa laga yaabaa inay dabagasho natiijada baaritaanka ilmahaaga iyo baaritaano dheeraad ah.

**KA DALBO WARAAQAHA ISKIRIINGAREYNTA DHIBICDA DHIIGGA EE ILMAHA DHASHAY- OO DHEERAAD AH**

Nidaamka dalabka warqada iyo foomamka NSW.

Waxaa daabacay:

73 Miller Street, North Sydney, NSW 2060
Locked Mail Bag 961, North Sydney 2059
Tel: 61–2–9391 9000

www.health.nsw.gov.au

SHPN 180312 April 2018

# NISKIRIINGAREYNTA DHIBCAHA DHIIGA EE ILMAHA DHASHA



## BAARITAANADA LA ILAALINAYA ILMAHAAGA

## WIISATADA HORE WAA U MUHIIM MUSTAQBALKA CAAFIMAADKA ILMAHAAGA IYO FIYOOBAANTA

NSW GOVERNMENT

**Somali**

# WAA MAXAY SABABTA ISKIRIINGAREYNTU AY MUHIIM U TAHAY

**Iskiriingareynta Dhibicda dhiiga ee Ilmaha dhashay waa baaritaan dhiig oo bilaash ah oo la siinayo ilma kasta oo ku dhasha NSW iyo ACT. Baaritaankan dhiig waa in la jeegareeyaa in ilmahaagu uu ku dhashay xaalad caafimaad.**

Haddii aan ilmahaaga lagu iskiriingareyn dhalashada oo uu qabo mid ka mid ah xaaladaha la iskiriingareynayo, koritaanka ilmaha waxaa laga yaabaa inuu saameeyo wakhtiga astaamuhu soo muuqdaan. Iyadoo ilmaha la siinayo daaweyn marka astaamuhu soo muuqdaan, kobiciisa iyo koritaanka wuxuu noqonayaa inuu haddaba uu waxyeelo. Qaar ka mid ah xaaladaha la iskiriingareyno ee laga yaabo inay noqdaan kuwo naf go' ah haddii daaweynta dib loo dhigo. ***Iskiriingareynta hore iyo ogaanshaha micnihiisu waxaa weeye daaweyntu hore ayey u bilaabaneysaa.***






***Marka Iskiriingareyntu ay Dhacdo***

Marka ilmahaagu uu u dhaxeeyo laba iyo saddex maalmood jir (taas oo u dhaxeysa 48 ilaa 72 saacaddood jir), ilmahaagu wuxuu qaadan doonaa baaritaankan. Umuliso ama kalkaaliso ayaa kaga mudu doonta cirbad ciribta ilmahaaga (cirbad khaas ah) oo ku qaadi doonta dhibco yar oo dhiig ah kaarka iskiriingareynta . ka dib, kaarka waxaa loo dirayaa shaybaarka dhexe si looga soo shaqeeyo.

## KA RAALI AHAANSHAHA ISKIRIINGAREYNTA

Ka hor intaan la qaadin saami, waa inaad siisaa Caafimaadka NSW ka raali ahaansho saxiixan oo ah inaad ogoshahay iskiriingareynta. Waxaa jirta qaybta ka raali ahaansho ah ee kaarka iskiriingareynta (hoos eeg) oo lagugu weydiin doono inaad saxiixdo haddii aad rabto in iskiriingareyntu sii socoto.

***Ka raali ahaanshaha kaarka iskiriingareynta***



NSW NEWBORN SCREENING PROGRAMME

**Consent for Collection and Testing of Sample**

I have received and understood the information in the NSW Newborn Screening pamphlet.

I consent to my baby having blood collected and tested Yes [ ] No [ ]

**Storage of screening card for greater than 2 years**

I consent to the storage of the screening card for longer than 2 years Yes [ ] No [ ]

I understand that blood from screening cards may be used for de-identified health research.

I agree to make my baby's blood sample available for this purpose Yes [ ] No [ ]

*Cards without consent will not be used for research*

Parents signature:

**Sax 'Haa' ama 'Maya':**

1. Ka raali ahaanshaha in ilmahaaga la iskiriingareeyo.
2. Ka raali ahaanshaha keydinta kaarka iskiriingareynta wax ka badan 2 sanno.
3. Ka raali ahaanshaha in kaarka loo isticmaalo cilmi baarista caafimaad haddii macluumaadka shakhsiyeed laga gooyo.

**Halkan saxiix**

**Waxaad dooran kartaa inaad tiraahdo HAA ta koowaad iyo MAYA laba shay ee kale haddii aad dooneysid.**

***Haddii aad doorato inaan ilmahaaga la iskiriingareyn***

Haddii aad doorato inaan ilmahaaga la iskiriingareyn, waxaa lagu weydiin doonaa inaad saxiixdo foomka diidmada iskiriingareynta oo ka duwan. Kaarka ilmahaaga ee iskiriingareynta waxaa weli loo diri doonaa shaybaarka isagoo wata foomka diidmada oo buuxa. ***Haddii aad go'aansato inaan ilmahaaga la iskiriingareyn, waxaan kugula talinaynaa inaad ogeysiiso dhakhtarkaaga qoyska iyo kalkaalisadaada caafimaadka qoyska iyo ilmaha inaan ilmahaaga la iskiriingareyn.***

## KA DIB ISKIRIINGAREYNTA

***Haddii natiijada iskiriingareyntu ay tahay mid caadi ah, lagulama soo xiriiri doono.***

Haddii loo baahan yahay iskiriingareynta in lagu celiyo, umulisadaada ama kalkaalisada caafimaadka qoyska iyo ilmaha ayaa kuu balamin doonta. Waxaa jira dhowr sababood laguula soo xiriiri karo:

1. waxaa laga yaabaa inuu shaybaarku u baahdo inuu qaado saamiga dhiig ku celis ah
2. haddii laguu sheego inuu ilmahaagu leeyahay natiijo iskiriingareyn oo aan caadi ahayn, waxaa laga qaadi doonaa saamiyaal badan waana la baarayaa.

Haddii ka dib baaritaano dheeraad ah saamiga dhiiga ee ilmahaagu uu ahaado mid laga helay mid ka mid ah xaaladaha, waxaa laguu diri doonaa dhakhtar takhasus leh.

## KEYDINTA KAARARKA ISKIRIINGAREYNTA

Kaararka iskiriingareynta waxaa lagu keydiyaa meel xiran oo ammaan ah had iyo jeer. Helitaanka kaararka la keydiyey si adag ayaa loo kontoroolaa oo uu u ilaaliyaa sharciga dawlad goboleedku.

Shaybaarku wuxuu heynayaa kaarka iskiriingareynta ilmahaaga ilaa laba sanno si tayo hubin iyo hantidhowr ahaan ujeedkeedu yahay. Laba sanno ka dib, waxaad weydiisan kartaa in kaarka iskiriingareynta ilmahaaga laguu soo celiyo adiga ama la burburiyo haddii aadan dooneyn in intaa ka badan lasii keydiyo. Haddii aad ku faraxsan tahay in kaarka iskiriingareynta la sii keydiyo, wuxuu sii haynayaa shaybaarku 18 sanno. Da'da sharciga ah ee raali ahaansho bixintu waa 18 sanno jir saa saraadeed isla marka ilmahaagu uu gaaro 18 ka dib kaarka waa la burburinayaa maadaama aysan ka raali ahaansho baarintaanka ah bixin.

***Yaa Kaarka Heli kara***

Ilmahaaga kaarkiisa waxaa la helayaa oo kaliya:

- haddii baaritaan shaybaareed dheeraad ah lagula taliyo ilmahaaga
- sheybaarka ujeedooyinka ah kontoroolka tayada iyo hantidhowrnimoba
- anshaxa la ogol yahay, cilmibaarista caafimaad halka dhammaan faahfaahinta shakhsiyeed laga goynayo si aan loo garan ilmahaaga.
- ammar maxkamadeed
- Xaqiijiyaha sababta dhimashada.

## ISKIRIINGAREYNTA XAALADO CAAFIMAAD OO GAAR AH

Barnaamijka Iskiriingareynta dhibicda Dhiigga ee Ilmaha dhashay wuxuu ka iskiriingareeyaa qiyaastii 100,000 ilmood sannadkii 25 xaaladood oo caafimaad. Wakhti ilaa ka wakhti, waxaa lagu dari doonaa xannuuno kale ama laga saari doonaa barnaamijka iskiriingareynta. Kuwaan soo socdaa waa xaaladaha guud ahaan la wiisateeyo.

**Hypothyroidism ka Koowaad ee Hidaha**

- Maqnaanshaha ama qaabka aan caadiga ahayn ama shaqada qanjirka qumanka wuxuu saameeyaa koritaanka ama wuxuu keenaa iinta garaadka haddii aan la daaweyn.
- Qiyaastii ilaa 40 ilmood ayaa sannadkii la wiisateeyaa.
- Daaweyntu waa in lagu daaweeyo hormoonada qumanka.

**Cystic Fibrosis**

- Hidaha aan shaqeynin wuxuu keenaa dheecaan dhumuc leh oo ay yeeshaan unugyo kala duwan oo jirkoo dhan ah, oo keenaya infekshin daran oo xabadka ah iyo inuu kori waayo haddii aan la daaweyn.
- Qiyaastii 30 ilmood ayaa sannadkii la wiisateeyaa.
- Shakhsiyaadka leh cystic fibrosis waxay ku yeeshaan soo haggaagid weyn oo caafimaadkooda ah haddii ay daaweynta hore u bilaabaan.

**Phenylketonuria (PKU)**

- Jirku ma awoodo inuu jebiyo aamino asidka phenylalanine ee muhiimka ah wuxuuna horseedi karaa iin garaad oo daran haddii aan la daaweyn.
- Qiyaastii ilaa 10 ilmood ayaa sannadkii la wiisateeyaa.
- Daaweynta PKU waa cunto leh phenylalanine hoose oo la bilaabo labada ama saddexda toddobaad ee ugu horeeya nolosha.

**Hoos u dhaca Silsilada Dhexdhexaadka ah ee Acyl Coa Dehydrogenase (MCAD):**

- Awood darada jirka ilaa baruurta gebi ahaan ku jebinaysa haddii aan la daaweyn, waxaa laga yaabaa inay noqoto naf-gooyo inta lagu jiro jirrooyinka carruurnimo ee guud.
- Qiyaastii 6-8 ilmood ayaa sannadkii la wiisateeyaa.
- Daaweyntu waxay ku lug leedahay qaadashada taxadar dheeraad ah inta lagu jiro jirrooyinka si loo hubiyo ilmuhu inuu helo qaadashada tamar ku filan.

**Hidaha Adrenal Hyperplasia**

- Awooda la bedelay ee qanjirka adrenal si uu u soo saaro hormoonada laga yaabo inay saameyaan isticmaalka, jawaabta infekshinka, awoodii ay ku xukumi lahaayeen heerarka cusbada iyo calaamadaha jinsiga.
- Qiyaastii 6-7 ilmood ayaa sannadkii la wiisateeyaa.
- Daaweynta waa daawo qaadasho sida bedelaada hormoonada iyo bedelaada cusbada.

**Xannuunada kale ee dhifka ah**

- Waxaa jira xannuuno kale oo dhif ah oo la yaabo inay saameeyaan ilmaha: qiyaastii 20 ayaa sannadkii ayuu wiisateeyaa Barnaamijka Iskiriingareynta Ilmaha dhashay ee NSW.